## Warbixintaan waxaa loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha. Waxayna ku saabsan tahay carruurta iyo dhallinyarada loo soo qoray daawada BUCCOLAM® (midazolam)

### Waa maxay daawada BUCCOLAM maxayna tarta?

Daawada BUCCOLAM waxaa laga sameeyay maaddo loo yaqaanno midazolam. Maadada Midazolam waxay ka tirsan tahay koox-daawoowin loo yaqaanno bensodiazepiner. Daawada BUCCOLAM waxaaa loo isticmaala markii carruurta iyo dhallinyarada (laga bilaabo markii ay 3 bilood jiraan ilaa <18 sano), joojinta muruqgo' lamafilaan oo raage ah. Dhallanka da'dooda u dhaxayso 3-6 bilood waxaa daawada noocaan lagu siiyaa oo keliya markii goob isbitaaleed ay ku sugan yihiin. Maxaayeelay waa goob qalabaysan lagana heli karo qalab lagu isticmaali karo haddii dhibaato halis ah ay dhacdo1. Daawadaan waxaa isticmaali karo oo keliya waalidiinta ama daryeeleyaasha carruurta iyo dhallinyarada oo la xaqiijiyay in ay qabaan cudurka qalalka [epilepsi].

Daawada BUCCOLAM waa daawo biyobiyo ah, waxayna ku keysan tahay baakooyin. Baako kasta waxaa ku jira 4 xabo oo afka laga qaato. Kuligooda waa isku qiyaas, waxayna ku dhex jiraan blaastik sida ay u waxyeelmi awgood. Irbad kasta:

- waxaa ku calaamadaysan midab hadba da'da cunugga
- irbad malaha, waxaana loogu talagalay in daawada BUCCOLAM awgeed loo adeegsado. Waxaa lagu shuba inta u dhaxayso gudaha canka ciridka hilibka ee hoose
- waxaa ku jirta oo keliya hal qiyaas

Hab taxadarsan u aqri una tixgeli farinta takhtarka oo mar kasta ah mid shaqsiyeed.

Xitaa blaastikada ku daboolan korkeeda waxaa ku qoran tilmaan fudud.
Waxaa kalo ku qoran tilaabooyin muhim ah oo u baahan in la tixgeliyo.

Daawadaan marna ha siin dadyoow kale sida carruurtooda ugu daryeelaan awgiis. Daawada BUCCOLAM sii oo keliya cunugga u takhtarka u soo qoray.

### Kaydinta

Daawada BUCCOLAM ku kaydi goob ka fog carruurta oona ishooda ku dhici karin. Siiringa ku kaydi blaastikada ay ku dhexjirto. Qaboowga ka ilaali. Marna ha gelin qaboojiyeha culus. Marna ha gelin qaboojiyeha fudud. Waxtarka dawada BUCCOLAM 5 mg, 7,5 mg iyo 10 mg waa 2 sano. Halka waxtarka dawada BUCCOLAM 2,5 mg u yahay 18 bilood. Daawada BUCCOLAM marna ha isticmaalin markii waxtarkeeda ay dhacdo (am EXP) ku qoran xaanshida yar ee kartoonka, galka iyo siiringa dusha ugu qoran. Taariikhda ugu dambayso waa maalinta bisha ku qoran ee ugu dambayso.

### Digniin iyo taxadarnaan

Haddii cunugga u qabo cudur kamid ah cudurrada ku dhaca kiliyadaha, beerka, ama wadnaha iyo/ama cudur sambabaha ku dhaca, kuwaasoo hab joogto ah sababa cillada neefsashada, waa in kahor intii aadan daawada BUCCOLAM siinin cunugga, waa inaad la hadasha takhtarka ama shaqaalaha farmashiyada. Kaddib markii daawadaan la qaato, waxaa dhici karto in qofku u iloowo wixii dhacay. Carruurta iyo dhallinyarada la siiyo daawada BUCCOLAM waa in aad kor laga ilaaliya kaddib markii daawada la siiyay. Daawadaan waa in laga ilaaliya qofka maandooriyeha ku isticmaalo ama khamriga cabbo.

#### Ubadkaaga ha siinin daawada BUCCOLAM haddii:

**U** xisaasi ku yahay daawada midazolam, maadooyinka bensodiazepiner (sida diazepam) ama maado kale oo daawadaan ku jiro
**U qabo** cudur ku dhaca dareen-wadeyaasha iyo murqaha oo sababa muruq liidasho
**U qabo** cillada neefsashada isagoo nasanaayo (cillada neefsashada way sii darsata haddii daawada BUCCOLAM la qaato)
**U qabo** cudur sababa in isago hurda ay neefta ku dhegto
**U qabo** dhaawac beerka oo culus


1. DAAWADA BUCCOLAM PRODUKTRESUMÉ. WWW.FASS.SE




Item code: C-ANPROM/SE//0792 Date of preparation: December 2019

# Tallaabo ku xigta tallaabo ku saabsan sida talada sida daawada BUCCOLAM® loo qaato

- Baakad kasta waxaa ku jirto xaansho wax ku qoran yihiin. Hab taxadarsan u aqriso warbixinta xaanshida ku qoran kahor qaadashada daawada BUCCOLAM
- Qaadashada kahor hubso in daawada aysan weli dhicin
- Ha qaadan daawada BUCCOLAM haddii galka blaastikada ka sameeysan ee siriingada ku dhexjirta furan yahay ama dhaawacsan yahay



**1** Qabo galka blaastikada ka sameeysan, jebi moorka ka diib koofiyada ka saar. Siiringa ka soo saar galka blaastikada ka sameeysan.




**2** Mudaca siiringada ka saar koofiyadda gaduudan, kaddib ku tuur meel sugan.



**3** Sulka iyo fardheereyda hab xasilan ku qabo daanka cunugga, kaddib dib u celi. Mudaca siiringada ku aadi dhinaca gadaal jira u dhaxeeya gudaha daanka iyo ciridka ilkaha hoose.

**4** Tartiib u riix bistanka siiringada ilaa ay ka joogsato. Qiyaasta daawada oo idil waa in hab xasilan lagu shubaa dhinaca gadaal jira u dhaxeeya gudaha daanka iyo ciridka ilkaha hoose (duleelka afka). Haddii takhatarku uu idinku taliyay in la siiyo (qiyaas intaa ka wayn iyo/ama loogu talagalay carruurta waawayn) nuska ugu horeeyo hab xasilan ka sii dhinac, inta hartay ka sii dinaca kale.



**5** Haddii gaadiidka bukaan-soocodka ama qof takhtar ah loo yeeray, sida u tusto awgeed ha tuurin siiringada maran. Qor saacadda aad daawada BUCCOLAM siisay iyo mudada qalalka u socday.



**6** La joog cunugga/da´yarka ilaa ka bogsado weerarka qalalka, oona miirkiisa dib u helo.

**Weliga ha siin qiyaas daawo ka badan tii u takhtarka kula taliyay inaad siiso.**

**Durbadiib/daahid la'aan wac gaadiidka bukaan-socodka/ambalans haddii:**

- Weerarka usan ciribtirmin 10 daqiiqo kaddib markii daawada BUCCOLAM aad siisay
- Aad cunugga aad siin karin daawada BUCCOLAM ama qiyaasta siiringada ku jirta
- Cunugga u hab xasilan u neefsanaayo ama usan neefsanayn ba
- Cunugga u matagaayo
- Aad cunugga siisay qiyaas kabadan qiyaastii loogu talagalay ee daawada BUCCOLAM
- Ka muuqdaan calaamadaha wadne istaag

**Weliga ha siin qiyaas dheeraad ee daawada BUCCOLAM adigo kahor la tashan takhtarkiisa, xitaa haddii:**

- Weerarka usan ciribtirmin
- Cunugga u matagaayo ama dhareer ka soo daadanaayo

Shire is now part of Takeda
**Shire Sverige AB** | Vasagatan 7 | 111 20 Stockholm, Sverige
Tel: +46 (0)8 544 964 00 | www.shiresverige.se

Item code: C-ANPROM/SE//0792 Date of preparation: December 2019